

Ka qaybgaleyaasha PACE waxaa waajib ah in ay helaan dhammaan daryeelka caafimaad ee loo baahan yahay, kaasoo ay kamid yihiin daryeelka kowaad iyo adeegyada dhakhtarka takhasuska ah (kaasoo aan ahayn adeegyada degdegga ah) kana imaanaya ururka PACE ama cid kale oo uu u fasaxay ururka PACE. Ka qaybgaleyaasha PACE waxaa laga yaabaa in si buuxda oo shakhsi ah uu ugu waajibo kharashaadka adeeg uusan ogolaan ama ka baxsan PACE. Adeegyada degdegga ah waa la daboolayaa.

Portland metro

503-215-6556

Clatsop/Tillamook

503-717-7150

Bilaash ku wac

1-855-415-6048

TTY / maqalka culus

1-800-848-4442

providence.org/elderplace

Insert_In-home services_CMS appv 02142020_Somali

Providence ElderPlace/PACE Adeegyada Hoyga Dhexdiisa



Adeegyada Hoyga Dhexdiisa waxay siinayaan dadka waaweyn awoodda ay nolosha ku sii wadan karaan ayagoo jooga hoygooda ayagoo taageero ka helaya ElderPlace/PACE. Taageerada waxaa kamid noqon kara caawinaada daryeelka shakhsiga ah, diyaarinta cuntada, guri ka shaqayn, xasuusinta daawada, iyo kuwo kale oo badan.

Adeegyada Hoyga Dhexdiisa waa hal qayb oo kamid ah xirmada dhammaystiran oo aad ka helayso Providence ElderPlace/PACE.

Adeegyada Hoyga Dhexdiisa waxa kamid noqon kara:

- Diyaarinta cuntada, dukaamaysiga, u adeegidda
- Guri ka shaqaynta
- Xasuusinta daawada
- Waxay ku caawinaysaa daryeelka shakhsiyadeed, sida qubayska, labiska iyo shanlaysiga
- Bookhashooyin joogto ah oo lagu tagayo Xarumahayaga Bulshada & Caafimaadka ee loogu tala galay howlaha, cuntooyinka, is-dhexgalka bulsho iyo daryeelka caafimaad
- Qaadidda lagaa qaadayo gurigaaga oo lagu gaynayo Xarunta Bulshada & Caafimaadka iyo ballamaha caafimaadka

Isu duweyaasha Daryeelka Hoyga ElderPlace/PACE waxaa laga heli karaa arrimaha xallinta dhibaatooyinka ee ku gadaaman daryeelka iyo adeegga ay ku siiyeen shabakaddayada aanu heshiiska kula jirno ee ah daryeelayaasha, hoyga dhexdiisa ee tabobaran ee xirfadda leh. Kooxdayada ElderPlace ee Isku Dhafana waa mid diyaar u ah in ay kaa taageerto u guuritaanka heer kale oo daryeel, haddii baahidu soo baxdo.

Kaalmada ElderPlace/PACE waxay bixinaysaa xulashooyin nololeed oo joogto ah, oo ay kamid yihiin guriyaynta ay soo saareen ElderPlace oo kuyaal Cully, Glendoveer iyo Xaafadda Irvington. Waxaan sidoo kale heshiis la galnaa goobo daryeel oo badan dhammaan aagga aanu adeegga ka bixino.